500 Summer St NE E20
Salem OR 97301
Codka: 503-947-2340
Fakiska: 503-947-2341

Janaayo 24, 2023

Muddada kama dambaysta ah ee u hoggaansanaanta gaariga-cunta ee guur-guura waxay keentay xiiso cusub oo loo lahaado xeerarka

Taariikhda hergelinta ee Janaayo 1 waxay timid ka dib sedex-sanadood oo ah muddo kordhin la siiyay ka-hawl-galayaasha gaari-gacanka cuntada

PORTLAND, Ore.- Xeerarka cusub ee gaariga-cunta ee guur-guura ee gobolka oo dhan ayaa si rasmi ah u dhaqan galay Janaayo 1, ka dib muddo kordhin saddex sano ah si loo siiyo ka-hawl-galayaasha wakhti ay ugu hoggaansamaan.

Xeerka cusub ee gawaarida cuntada ee guur-guura, ama gaari-gacanka cuntada, waxaa la sameeyey Febraayo 1, 2020, si degmooyinka gobolka oo dhan ay u xoojiyaan fulinta iyo ilaalinta bulshada.

Ka-hawl-galayaasha waxaa la siiyay saddex sano si ay ugu hoggaansamaan, laakiin cudurka faafa ee COVID-19 dartiis, OHA iyo hay'adaha caafimaadka fayo-dhawrka ee maxalliga ah waxay sii wadeen inay taageeraan oo ay diyaar u yihiin inay kala shaqeeyaan hawl-galayaasha jadwalka u hoggaansanaanta si ay u siiyaan wakhti dheeraad ah. **Gawaarida cuntada ee guur-guura lama xiri doono isla markaaba haddii aysan u hoggaansanayn xeerarka cusub haddii ay si firfircoon uga shaqeynayaan xal ay oggolaadeen Maamulka Caafimaadka Fayo-dhawrka ee Maxalliga ah.**

Gawaarida cuntada ee guur-guura waxay ka kooban yihiin ganacsiyo kala duwan oo kobcaya oo ah wax lagu yaqaano qaran ahaan Oregon. Maamulka Caafimaadka ee Oregon (OHA) waxay taageertaa kobcintooda gobolka oo dhan. Hay'addu waa mid gaar ah oo si otomaatig ah ugama baahna gaari inuu yeesho jikad/qalabyo – jiko ruqsad leh oo lagu dhaqi karo saxamada, cuntada loo diyaariyey si hore, iyo cuntada iyo qalabyada lagu keydiyay – haddii ay ka-hawl-galayaasha muujin karaan inuu gaarigooda noqon karo mid isku filan. Ka-hawl-galayaasha waa inay, hasa ahaatee, wax walba ku hayaan "ka-qayb ahaan" gaarigooda oo ay ku shaqeeyaan gudaha awooda gaariga.

Qayb ka Ahaan

200-141150 (01/26/2023) Somali

Qayb ka Ahaan macnaheedu waa in dhammaan qalabka ku xiran gaariga guur-guura ay si adag iyo jir ahaan ku dhagan yihiin gaariga iyada oo aan xadidin dhaqdhaqaaqa gaariga inta lagu jiro dhaqaaqida.

Gobolka gudahiisa, waxaa ka jiray caqabado waxyaaba aan qayb ka ahayn oo yaala dhulka gudaha gawaarida cuntada ee guur-guura, taasoo abuuraya goobo ay ku uruuraan cayayaanka iyo jiirka. Sababtaas darteed, OHA waxay xoojisay hirgelinta loogu talagalay xadgudubyada iyada oo taageerid laga helayo Gudiga La-talinta Xeerka.

Xeerarka

Dhammaan gawaarida cuntada ee guur-guura waa qasab in loo qaabeeyaa iyagoo leh haamaha/fuustooyinka biyaha nadiifta ah iyo biyaha-wasaqda ah oo qayb ka ah, gudihiisana ku yaala. Gaariga cuntada ee guur-guura waxay sidoo kale ku xiran karaan biyaha iyo bullaacadda haddii laga heli karo meesha ka hawlgalka, laakiinse haamaha/fuustooyinka waa inay had iyo jeer ku sii jiraan gaariga. Hal ka-reebitaan ayaa quseeya gawaarida cuntada ee guur-guura ee haysta ruqsad ah mid ka hor Febraayo 1, 2020, kaas oo haamaha/fuustooyinka biyaha iyo tuubooyinka la xiriira laga saaray ka hor taariikhdaas. Gawaaridaa loogama baahna inay dib ugu soo rakibaan/xiraan haamaha/fuustooyinka iyo tuubooyinka la xiriira haddii gaarigaa uu wali ku xiran yahay nidaam biyaha iyo bullaacad la oggolaaday.

Gaariga cuntada ee guur-guura kuma xiran karo nidaam biyo nadiif ah isagoo sidoo kale ku xirneyn nidaam bullaacad la oggolaaday.

Maadaama ay qasab tahay in dhammaan hawlgallada iyo qalabka ay qayb ka ahaadaan gaariga cuntada ee guur-guura, gawaarida isticmaala haamaha kaydinta biyaha nadiifta ah yo biyaha wasakhda ah ee aan qayb ka ahayn gaariga waa inay joojiyaan isticmaalida haamahan/fuustooyinkaan.

Gaariga cuntada ee guur-guura wuxuu isticmaali karaa khaanadaha la-laalaabi karo ama miisaska yaryar ee qayb ka ah gaariga si ay ugugu soo bandhigaan waxyaabaha aan laheyn khatar suuragal ah iyo waxyaabaha isticmaalida-mar-qura ee macaamiisha, sida alaabaha (suxuunta/koobabka) iyo tiishka xaanshida ah ee hal marka la isticmaalo. Khaanadaha ama miisaska yaryar waa in loo qaabeeyaa oo lagu rakibaa si aysan u carqaladeynin dhaqdhaqaaqa gaariga marka dib loo laabayo.

Waa maxay waxa aan is beddelin

Waxyaabaha ka baxsan gaariga sida qaboojiyaha, haamaha/fuustooyinka shidaalka/gaaska iyo haamaha/fuustooyinka biyaha/biyaha-wasakhda ah waligood lama oggolaan, wax isbeddel ahna kama jiraan shuruudaha. Xadgudubyadaasi hadda waxay ka layhiin mudnaanta ugu sareysa Xeerarka Nadaafadda Cuntada, iyadoo u oggolaaneysa kormeerayaasha degmada awood sii weyn si ay u dhaqan geliyaan. Intaa waxaa sii dheer, haamaha/fuustooyinka biyaha ee ka baxsan gaariga waxay noqdaan dhibaato xaga caafimaadka fayo-dhawrka ah marka biyaha wasakhda ah ay daataan ama ay jirto biyo-qubid goobta ah oo aan habooneyn.

Macluumaad Taariikh

Sanadka 2018, Barnaamijka Ka Hortagga Cudurka Ka Dhasha Cuntada ee OHA wuxuu sameeyay Gudi La-talin Xeer oo ay ka mid yihiin ka-hawl-galayaasha gaariga cuntada ee guur-guura, dhinacyada xiiseynaya, wakiillada ururka ganacsiyada iyo koormeerayaasha.

Sannadkii xigay, OHA waxay qabatay shirar macluumaad bixin ah, kuna martiqaaday cid kasta oo ka mid ah ka-hawl-galayaasha gaariga cuntada ee guur guura ee gobolka oo dhan inay imaadaan. Shirarka – gudaha Bend, Medford iyo Salem - waxaa ka mid ahaa bandhigyo iyo wada-hadalo ku saabsan xeerarka la soo jeediyay, wakhtiga geedi socodka xeer-sameynta iyo kalfadhi su'aalo iyo jawaabo ah.

Ka dib markii la dhageystay hadalada rasmiga ah ee xeerarka la soo jeediyay inta uu shirka dadweynaha uu socday, OHA waxay sameysay dukumentiyo qeexaya isbeddelada xeerka ee muhiimka ah. Isbeddeladaan xeerka ayaa laga heli karay online-ka oo loogu talagalay dadweynaha ilaa iyo laga soo bilaabo sanadkii 2019. Shaqaalaha kormeerka ee waaxda caafimaadka degmada ayaa markaa ka dib u qaybiyay dukumintigaas dhammaan ka-hawl-galayaasha gaariga cuntada ee guur-guura inta lagu gudajiray kormeerka (sanadka 2019 oo dhan).

Ka-hawl-galayaasha iyo dadweynaha waxay wax badan kaga baran karaan xeerarka cuntada iyo badbaadada ee gawaarida cuntada ee guur-guura halkan: https://www.oregon.gov/oha/PH/HEALTHYENVIRONMENTS/FOODSAFETY/Documents/foodsanitationrulesweb.pdf

Linkiga dukumintiga isbeddelada muhiimka ah ayaa laga heli karaa halkan: https://www.oregon.gov/oha/PH/HEALTHYENVIRONMENTS/FOODSAFETY/Documents/musignifchangenglish.pdf

Halkan waxaa ah linkiga websaydka badbaadada cuntada ee OHA: https://www.oregon.gov/oha/PH/HEALTHYENVIRONMENTS/FOODSAFETY/Pages/index.aspx

La Xiriirida Warbaahinta: Erica Heartquist, 503-871-8843,

PHD.Communications@oha.oregon.gov

Helitaanka dukumiintiga: Shakhsiyaadka naafada ah ama shakhsiyaadka ku hadla luuqad aan ka aheyn Ingiriis, OHA waxay ku bixin kartaa xogta qaabab kale oo dadban sida fasiraadaha, daabicida farta waaweyn, ama farta indhoolayaasha. Kala xiriir Qeybta Isgaarsiinta ee COVID-19 lambarka 1-971-673-2411, 711 TTY ama COVID19.LanguageAccess@dhsoha.state.or.us